

# CAAWIMO U RAADSO BIILKAAGA XCEL ENERGY

INFORMATION SHEET  
MINNESOTA

DHAWAAN LA FILAYO: BARNAAMIJKA DAYNTA  
QORSHAHA LACAG-BIXINTA



Waa mid naga go'an caawinta macaamiishu inta lagu jiro caqabadaha aafada cudurka safmarka ah. Haddii aad tahay macmiil deggan Minnesota oo biilashaada korontada Xcel Energy aad la daahday, waxaa dhici karta inaad mutaysatay barnaamij cusub oo kaa caawiya inaad dayn-baxdo.

**Barnaamijka Daynta Qorshaha Lacag-bixinta waxaa uu diyaar noqon doonaa dhammaadka gu'gan.** Haddii baaqiga kugu taagan ee biilka korontada Xcel Energy uu u dhexeeyo 1,000 iyo 4,000 oo doolar, waxaa dhici karta inaad mutaysatay inaad iska diiwaangaliso. Barnaamijka cusub wuxuu ka dhaafayaa ilaa 75% lacagta daynta muddo dhaaftay ee biilashada korontada Xcel Energy macaamiisha mutaysatay.

Waa tan sida uu u shaqayn doono:

- 1. Marka barnaamijku bilaabmo dhammaadka gu'gan,** nala diyaarso qorshe aad lacagta ku bixinayso. Qorshayaasha lacag-bixintu waxay socon karaan muddo hal sano ah. Haddii aad mutaysatay Barnaamijka Daynta Qorshaha Lacag-bixinta, si otomaatig ah ayaa lagu diiwaangalin markii aad diyaarsato qorshe lacag-bixin. Xataa haddii aadan mutaysan Barnaamijka Daynta Qorshaha Lacag-bixinta, wali waxaa dhici karta inaad awood u leedahay inaad diyaarsato qorshe lacag-bixin ama aad mutaysatay ikhtiyaaro kaalmo oo kale.
- 2. Kadib markii aad iska diiwaangaliso Barnaamijka Daynta Qorshaha Lacag-bixinta,** waxaad heli doontaa **dayn biilka ah oo u dhiganta 25% baaqiga kugu taagan** ee biilkaaga korontada.
- 3. Sii wad bixinta lacagta bil kasta.** Markii aad bixiso lacagta hadda taagan ee biilkaaga ee lacagaha aad ku bixiso Barnaamijkaaga Daynta Qorshaha Lacag-bixinta, waxaad heli doontaa biilka lagugu leeyahay bil kasta, kaasi oo dhan **50% baaqiga asalka ah** ee xisaabtaada muddada uu socdo qorshahaaga lacag-bixintu.

Waa kan tusaale:

Lacagta bishan	\$35.00
Baaqiga muddo dhaafay	\$1,155.00
Daynta isdiiwaangalinta qorshaha lacag-bixinta: 25% baaqiga muddo dhaafay	-\$288.75
Daynta harsan qorshaha lacag-bixinta: 50% baaqiga muddo dhaafay (ku habboon haftada billaha ah)	-\$577.50
<b>Wadarta dhigmaysa</b>	<b>\$866.25</b>



Find the latest information at  
[xcelenergy.com/  
PaymentPlanCredit](https://www.xcelenergy.com/PaymentPlanCredit)

Baaqiga muddo dhaafay \$288.75

## Lacagta la bixinayo bishii

\$288.75 in ka badan 3 bilood	\$96.25 + biilka bisha taagan
\$288.75 in ka badan 6 bilood	\$48.13 + biilka bisha taagan
\$288.75 in ka badan 11 bilood	\$26.25 + biilka bisha taagan

Barnaamijkan Daynta Qorshaha Lacag-bixinta waxaa loo heli doonaa sida loo soo kala horreeyo, kaqaybqaadashaduna waa kooban tahay. Marka barnaamijku diyaar noqdo, Xcel Energy si toos ah ayey ula xiriiri doontaa macaamiisha mutaystay. Xcel Energy waxay ku bixinaysaa \$17.5 milyan caawinta macmiilka ee tooska ah iyadoo u maraysa Barnaamijka Daynta Qorshaha Lacag-bixinta.

### Su'aalaha Badanaa la Iswaydiiyo

#### Waa maxay?

Barnaamijka Daynta Qorshaha Lacag-bixinta wuxuu ka caawiyaa macaamiisha inay ka dayn-baxaan biilasha korontada iyadoo laga dhaafayo 75% baaqida muddo dhaafay ee ku taagan. Haddii aad mutaysatay, waxaad heli doontaa dayn biil oo u dhiganta 25% baaqiga xisaabtaada ku taagan kadib isdiwaangalinta. Inta aad waddo ku bixinta lacag qorshahaaga bil kasta, waxaad heli doontaa biil daymeed bil kasta, oo gaaraya 50% kale baaqiga asalk ahaa ee xisaabtaada iyadoo biilkaaga ayna waxba kugu baaqanayn.

#### Ayaa mutaystay?

Macmiil kasta oo korontada guriga ee Xcel Energy isticmaala kaasi oo lagu leeyahay inta u dhaxasya \$1,000 ilaa \$4,000 biilka korontada waa mid mutaystay. Marka la eego macaamiisha isticmaala adeegga korontada iyo gaaska dabiiciga ah, barnaamijku wuxuu kaliya khuseeyaa qaybta korontada ee biilka.

#### Sidee aan isku diiwaangalin karaa?

Barnaamijku wuxuu isqorista bilaabi doonaa dhammaadka gu'ga ama horraanta xagaaga. Xcel Energy si toos ah ayey ula xiriiri doontaa macaamiisha mutaystay marka barnaamijku diyaar noqdo. Lacagta loo hayaa way kooban tahay, waxaana loo bixin sida loo soo kala horreeyo.

#### Muddo intee le'eg ayuu qaadan qorshaha lacag-bixintu?

Qorshayaasha lacag-bixintu waxay socon karaan ilaa hal sano.

#### Ka waran haddaan lacag bixin waayo halmar?

Haddii aad ka diiwaangashan tahay Barnaamijka Daynta Qorshaha Lacag-bixinta, waxaad u baahan doontaa inaad bixiso lacagta kugu taagan bil kasta, iyo haftada qorshahaaga lacag-bixinta. Haddii aad bixin waydo laba lacagood oo isku xiga, waxaa lagaa saari doonaa barnaamijka. Wixii daymo hore ugu taagnaa xisaabtaada sidooda ayaa loo dayn. Daymaha la muddeeyey ee mustaqbalka ayaa dib loogu cusboonaysiin barnaamijka markaa waxaanu siin karnaa maalgalinta macaamiisha kale.

#### Miyaa adeegga la iga jari doonaa?

Xcel Energy ka jari mayso adeegga cid leh qorshe lacag-bixin oo cusub. Had iyo jeer waxaanu kala shaqayn doonaa macaamiisha inay diyaarsadaan qorshe lacag-bixin, xataa haddii Barnaamijka Daynta aanu jirin.

#### Ayaa lacagta siinaya barnaamijka?

Xcel Energy ayaa ku bixinaysa \$17.5 milyan barnaamijka.



### Dhaqaale Dheeraad ah oo kaa Caawinaya Biilashada

Waanu ognahay in wakhtigan mid adag yahay, waxaananu diyaar u nahay inaanu idin caawino. Had iyo jeer waxaanu kaala shaqayn inaad diyaarsato qorshe lacag-bixin iyo inaad hesho khayraad kale:

- **Barnaamijka Kaalmada Tamarta**

Barnaamijka Kaalmada Tamarta (EAP) waxaa maalgaliya Waaxda Maraykanka ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha ee fadaraalka. Mutaysigu wuxuu ku salaysan yahay dakhligaaga saddexdii bilood ee u dambeeyey, wakhtiga loo qabtay dalabkana waxaa laga dhigay Maajo 31, 2021. Booqo [mn.gov/commerce/consumers/consumer-assistance/energy-assistance](https://mn.gov/commerce/consumers/consumer-assistance/energy-assistance) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

- **Kaalmada fadaraalka**

Kaalmada kirada ee la ballaariyey, taasi oo loo isticmaali karo kharashka adeegga laydhka iyo biyaha, waxaa heli kara qoysaska ay saamaysay aafada COVID-19 ee safmarka ah. Booqo [usa.gov/help-with-bills](https://usa.gov/help-with-bills) si aad u ogaato wax badan.

- **Barnaamijka Qiime-dhimista Waayeelka**

Macaamiisha korontada ee dakhligoodu heerka u qalmidda gaarsiisan yahay ee da' doodu ugu yaraan tahay 62 iyo/ama naafada ah waxay u qalmi karaan \$15 qiime-dhims ah halkii biil ee lagu soo dallacaba.

- **U Soo Xiriir helitaanka Sanduuqa Shidaalka Diirinta (Reach Out for Warmth Fuel Fund)**

U Soo Xiriir helitaanka sanduuqa shidaalka Diirinta waxaa loogu talagalay inuu caawiyo qoysaska saboolka ah iyo kuwan wax yar uun ka sarreeya tilmaamaha dakhliga. Wac 800-657-3710 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

- **United Way 2-1-1**

United Way 2-1-1 waxay bixisaa lambar si fudud loo xasuusan karo oo saddex jifir ah oo aad wici karto si aad u hesho macluumaad bilaash ah oo qarsoodi ah oo ku saabsan adeegyada caafimaadka iyo aadanaha, oo ay ku jiraan macluumaad ku saabsan barnaamijyada kaalmada korontada iyo biyaha.



Su'aalo ma ka qabtaa ama caawimo ma uga baahan tahay biilkaaga? Adiga ayaanu heegan kuu nahay. U dir iimayl [inquire@xcelenergy.com](mailto:inquire@xcelenergy.com) ama naga soo wac **800-895-4999**.